# U HOOGSANAANTA ADEEGYADA LA XIRIIRO CAAFIMADKA EE MEDICAID

## 1. Bayaanka Siyaasada

Gudiga Waxbarashada waxa ay aqoonsan yihiin mas'uuliyada ka saaran bixinta adeegyada caruurta naafada ah iyo in ay raacaan lacagaha laga helaayo ilaha federaalka ee ujeedadaan. Sidaas awgeed, Dugsiga Degmada Magaalada Rochester (RCSD) waxay si firfircoon uga raadisaa qarash celinta Waaxda Waxbarashada Gobolka New York iyo Waaxda Caafimaadka ee Gobolka New York adeegyada caafimaadka la xiriiro ee la siiyo Medicaid caruurta naafada ah ee xaqa u leh.

## 2. Ujeedada

Ujeedada siyaasadaan waa in lagu ogolaado shuruudaha ay RCSD ku raadin karto lacag celinta adeegyada caafimaadka la xiriiro ee la siiyo Medicaid caruurta naafada ah.

## 3. Qeexitaano

a. Adeegyada La Xiriiro Caafimaadka - Adeegyada ay ku jiraan maqalka, nafaqada, daaweynta shaqada, daaweynta jireed, shaqada bulshada, latalinta, kalkaalinta, hadalka iyo luqada, cilmi nafsiga iyo adeegyada kale ee ay ansixiyeen sharciyada federaalka.

b. Barnaamijka Waxbarashada Shaqsi Ahaaneed (IEP) - Barnaamij waxbarasho oo loogu talagalay canug kasto oo naafo ah sida ay ku taliyaan kooxda IEP.

c. Qayb Biilasha-Biilasha – Habka biilasha Medicaid ee dib u bixinta adeegyada caafimaadka la xiriiro ee Medicaid ee u qalmo caruurta naafada RCSD ee bixiyayaasha adeega RCSD.

## 4. U Hogaansanaanta

Waaxda Waxbarashada Gaarka ah ee RCSD ayaa mas'uul ka ah hagida iyo helitaanka dukumeentiyada lagama maarmaanka ah iyo shuruudaha looga baahan yahay u hogaansanaanta Medicaid. Waaxda RCSD ee Medicaid waxaa loo xilsaaray mas'uuliyada guud ee dib u eegista iyo ka warbixinta u hogaansanaanta Medicaid ee lagama maarmaanka ah. Waaxda Medicaid waxay sidoo kale kormeertaa habka biilasha qolo sadexaad si ay u raadsato dib u bixinta Medicaid ee adeegyada la xiriiro caafimaadka. Medicaid sidoo kale waxay mas'uul ka tahay hirgelinta barnaamij u hogaansanaan wax ku ool ah oo ay ku jiraan sifooyinka soo socdo:

a. Shuruucda Kormeeraha Guud ee qoran ayaa looga baahan yahay inay bixiyaan hagitaan, ka warbixin, cadayn, shahaado siinta gobolka, baaritaanada, iyo hababka xalinta ee la xiriiro hawlaha Medicaid.

b. Sarkaalka u hogaansanaanta Medicaid waa in loo qoondeeyaa inoo si toos ah ugu sheego maamulaha sare ee ku saabsan barnaamijkaan.

c. Tababarka Medicaid ee joogtada ah ee shaqaalaha RCSD waa inoo jiraa.

d. Habka daah furka sirta ah waa inoo jiraa si loo suurtageliyo warbixinta qarsoodiga ah.

e. Nidaamyada waa inay taageeraan cagajugleyn la'aan iyo aargoosi la'aan iyo warbixin daacad ah.

f. Nidaam lagu xaqiijinaayo dhaqangelinta cadaalada ah iyo waxyaabaha u horseedaayo habdhaqanka aan u hogaansamin ama ku guuldaraysiga in la soo sheego u hogaansanaan la'aanta waa in ay jiraan.

g. Waa in la qeexaa iyo la dejiyaa nidaam sida loo xaliyo u hogaansanaan la'aanta iyo hubinta ka hortaga u hogaansanaan la'aanta.

h. Qatarta u hogaansanaanta ee ku saleysan qiimeynta noocyada bixiyayaasha caadiga ah waa in si joogto ah loo qiimeeyaa. Hawlaha waa in la hirgeliyaa iyo la diiwaangeliyaa si loo maareeyo qatarahaas.

**5. Doorashada Maamulka**

Kormeeraha guud ayaa loo idmaday iyo mas'uul ka ah horumarinta hababka ku haboon ee hirgelinta siyaasada.

**6. Kormeerka**

Sarkaalka U Hogaansanaanta Medicaid waa inoo warbixin siiyo Gudiga Waxbarashada ugu yaraan sanadkii.

| | |
|---|---|
| Tixraac aan Toos aheyn: | Hormarinta Xeerarka (3310)<br>Warbixinada Maaliyada iyo Go'aamada (6630)<br>Iibsashada (6700)<br>Xiriirka Iibka (6750)<br>U Hogaansanaanta Medicaid iyo Barnaamijka Daacadnimada (8600-R)<br>Beeniyaha (9645) |
| Tixraac: | Barnaamijka U Hogaansanaanta Medicaid 18 NYCRR Qaybta 521<br>Sharciga Adeegyada Bulshada Qaybta 363-d iyo NYCRR Qaybta 521 |
| Qoraal Xassus: | La qaatay Diseembar 17, 2009 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2009-10: 490; Wax laga bedelay Abriil 25, 2013 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2012-13: 618; Wax laga bedelay Maarso 23, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 555 |

ct/sg